# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

## Kal-fadhigii 40aad Fadhigii 10aad

**Isniin 08 - July - 2019**

**Quraanka: -** Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

Ajandaha Fadhiga:- Doodda Xeerka ka-hortaga Maydhaanka Lacagaha.

**Md Cabidraxmaan Yusuf Cartan** **(4min 43sec):-** Bismilahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, xildhibaanada sharafta leh, waan idin salaamayaa Aslaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu. Guddoomiye fikirkii xildhibaanadu soo jeedinayeen waa taageerayaa, idinkuna waad ka cudur daarateen. Aynu iska adkayno xeerarkaa inaga soo galaya meelaha qaldan. Waxaan u baxayaa in aan ka hadlo cinwaanka xeerka oo ilaa 2015 xeerkan ina horyaalay waxa ku qornaa xeerka maydhista Lacagta. Xeerkaa maydhista lacagta waxaan leeyahay eraygaasi sax maaha, waana in loo bedelaa xeerka maydhaanka lacagta oo macnaheedu yahay oo dhaqan ahaan.

Waxa jiray dhaqan ereyga maydhaanka dad aqoonyahan oo xeerkan dhagaystay ayaa waxay talo bixiyeen, waar Baarlamaanoow xeerkii imikuu idinla yaalaa yaanu ku bixin talo ahaan dadweynihii danaynaye waanu xeerku ku bixin maydhista. Xeerkaasi ha ku baxo maydhaanka.

Wax allaale wixii reer miyi ahaa ama dhaqanka yaqaanaa erayga maydhaanka way garanayaan oo waa wax la bedel oo wuxuu ahaa laga bedelay, si foojari ah loo bedelay ama dhoobo la mariyey, ama la gubaba xitaa, si sumadu u baabado maydhaan baa la yidhaa. Maadaama oo dhaqan keenu ka soo jeedo reer miyigii, waxaan soo jeedin lahaa xildhibaanada sharafta leh na aan ka codsan lahaa in aynu maydhista ka guurno. Xeerkii inaga gacanta ku hayna cid kale oo inooga dambaynaysaa ma jirto "**Xeerka Maydhaanka Lacagta".** Kaas ayaan soo jeedinayaa waxaan jeclaan lahaa in xildhibaanadu kaas seconding igu bixiyaan. **Maydhaanku** waxa weeyaan geela la soo dhaco. Lacagtan maydhida la leeyahay waa lacag asal ahaan raadkeeda la baabiinayo oo la qarinayo meeshii ay ka timid, sidan waa marka geel aan la lahayn la bedelayo ayaa maydhaan lagu sameeyaa.

Markaa lacagta waxa lagala baxsanayaa sharciga, cashuurta iyo in la ogaado meesha laga keenay lacagtan. Markaa anigu waxaan leeyahay magac ha laga dhigo Maydhaan.

**Md Axmed Ducaale Bulaale** **(2 min 10 sec):-** Anigu guddoomiye waxaan leeyahay xeerka kan ee xukuumadu inoo soo gudbisay, soo jeedinta guddida iyo cabashada ay soo jeediyeen way ina hortaalaa. Horta xeer waliba waxa uu leeyahay mabaadiida iyo u jeedo laga leeyahay. Haddii aan dhex maro xildhibaanad u jeedada laga leeyahay iyo mabaadiida laga leeyahay garanba maayaan.

Xeerka kasta siduu u anfacayo ama sida uu wax uga tarayo u jeedada laga leedahay in loo dhigo, aniga waxay ila tahay markaas yeynaan idhaha ka ridin. Sidaan u fahansanahay xeerka ma garanayo oo xildhibaanadaas ayaan la mid ahay, laakiin waxay ka doonayaa inuu yeesho hab caalami ah, siday hay'adaha iyo cida ay lacagta ka doonayaan ula macaamilaan, markaa waxaan leeyahay yeynaan indhaha ka tuurin guddoomiye ee sida uu anfacayo Baanka.

Saamayntu leeyahay waa saamayn dhaqaale, markaa sida uu u anfacayo Baanka ee hab caalami ah u noqon karo aynu sida Banka anfacaysa boqolkiiba boqol u dayno yeynaan indhah ka ridine. Asalaamun Calaykum.

**Md. Ibaahim Jaamac Cali (Rayte)** **(6min 23sec):-** Guddoomiyaha, xildhibaanada iyo martida kaleba waan salaamayaa. Horta marka ugu horaysa waxaan teegeerayaa soo jeedintii magac xeerka ee c/raxmaan Yuusuf Cartan. Xeerkan marka afsoomaali loo turjumo magac waxa la yidhaa laundry, erayga maydhisna xalkaas ayuun buu ka yimid, laakiin afkeena soomaaliga wixii la xado ama dariiq aan sax ahayn la soo mariyo, ereyga loo istcimaalo marka la doonayo in raadkiisa la baabiiyo waa "Maydhaan" waa la maydhaamay oo geela sumadiisa ayaa la baabiiyaa mid kalaa lagu sameeyaa, geedka ciinka la yidhaahdo ayaa la mariyaa si ay dhogortiisu igu qabsato neef kaluu u eekaadaa waxaan la yidhaa waa la maydhaamay.

Xeerka ujeedadiisa ee Axmed ducaale ka hadlayaa waxa weeye. Lacagtu waxay leedahay dariiqooyin sharci ah oo ay marto inta badana waxa la yidhaa waa lacag aan meel aan xalaal ahayn ka soo baxday. Xeerka muhiimadiisu runtii waxa weeyaan lacagaha ku socda argagixisada iyo dadka faldambiyeedyada ka wada aduunyada in lagu xakameeyo oo aanay helin dariiq lacagi u soo marin. Waxa kale oo faa'iido in xoojiyo musuq maasuqana inuu la dagaalamo.

Waxaan xeerkan kaga warwarsanahay nidaamkeenii maaliyadeed ayaan marka hore aan sharci ahaan degsanayn. System ama nidaamka maaliyadeed oo habaysan oo cidi kaantaroosho cid hoos yimaada, hay'adaha dawlada ku wada xidhan oo dhamaystirani ma jiro. Ganacsigeenu waa iska ganacsi suuq, lacagta mararka qaarkood waxa lagu sitaa jawaano. Adhilayaashu markay wax iibsanayaa dariiqooyinkaa ma maraaan.

Waxa kaliya ee aan ka warwarsanahay waxa weeye,iyada oo aan la horumarin nidaamkeenii maaliyadeed oo aanu dhismin, maanta Matalan ma lihin xeerkii ganacsiga Bananka oo baanan gacnacsi ma lihin, xeerkii sarif-layaasha ma lihin. Banku malaha

awood sidaas oo uu wax kaga qabto. Waxa soo galaya ciidankii iyo baadhistii. Waxa jira madhnaasho sharci oo xeerkani ku dhex dhacayaa, sida in aanu xaqiijinayn u jeedadii laga lahaa anigu horta werwer ayaan ka qabaa waa mid, waa ta labaad in aanu ka dhalayn caqabad is hortaagnaa ganacsigeenii iyo dhaqdhaqaaqii lacageed ee sharciga ahaa ee xaaraanta iyo dambiyada waxna aanay ku jirin. Iyada waxa suurto gal ah inoo xakameeyo, markaa waxaan odhan lahaa mudane guddoomiye in ayu xeerkan muddo ku qaadano oo xeerkeenan maaliyadeed iyo wixii inoo dhisan aynu is waafajino.

**Md. Xasan Xuseen Shide** **(2min 40sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo Marti sharafta waxaan ku salaamayaa islaamka Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu. Waxaan marka hore taageerayaa eray bixinta Maydhaanka, mar labaad maney laundry waxa uu bilaabmay wixii ka dambeeyey 9 11 oo dalalka reer yurub iyo wadamadan wax haystaan ay bilaabeen si ay u cuna-qabateeyaan haddii ay argagixiso tahay, haddii si kale wax loo fulinayo ama cabudhin kale. Dalalkaas waxa u dhisan hab maaliyadeed iyo in lala socdo qof kasta account-kiisa. Ka aan shaqayn way ogyihiin, ka shaqeeyana cashuur ayaa laga qaadaa, ka baayac mushtarigu waa laga qaadaa, markaa qof aan lagu fulin ma jirto. Haddii qofku wiig maqnaado waxa la waydiiyaa xaguu ku maqnaa, waa dalal la ogyahay waxa soo gala iyo wax ka baxay oo hab maaliyadeed-ka uu kantarool ku jiro.

Halkeenan qofku hal maalin ayuu ku noqonayaa taajir, isaga oo aan waxba hayn ayuu guri weyn dhisanayaa. Lacagtu waxay inoo soo gashaa si kale, adhibaa qof iibinayaa lacagtii oo jawaano lagu sido ayuu dubai la tagayaa.markaa baayac mashtarkeeni sidaas ayey u shaqeeyaan, laakiin waxaynu nahay oral society markaa waynu ogaanaa, hebel adhi ayuu iibiyey, hebel aabihii ayuu dhaxlay markaa lacagta si dadban ayaynu u helnaa.

Waxaan odhan lahaa xeerkani wali heerkiisii muu gaadhin loomana bisla, sidaa daraadeed waan yar hakin lahayn, waa ay fiican tahay in aynu raacno, laakiin waa in aynaan si indho la'aan ah u daba gelin. Dawladaha adduunku sidaas ayay sameeyaa ee aynu sidaas samayno caqli iilama eekaa.

Waxa kale oo jira xeerar kale oo kuwan ka muhiimsan oo umadan wax u tari kara oo inoo yaala inta aynu ku meeraysanayno money laundry oo umadu inooga fadhiso inaynu pass garayno. Kuwaas aynu soo horumarino, kana aynu wakhtigiisa siino. Dalkeenu uma bisla sidii uu xidhibaankii iga horeeyey sheegay, waxaa ka dhalanaya dambiyo badan oo la inagu daba geli karo. Waxa la ina waydiinayaa xageed lacagtan ka keentay oo waxa la xayiri karaa inta yar ee aynu ku dhaq dhaqaaqno, markaa dib ha loo dhigo ayaan leeyahay.

**Md. Maxamed Jaamac Cabdi** **(2min 20sec):-** Waxaan marka hore soo jeedinayaa in laga saaro meesha soo jeedinta guddida oo laga doodo xeerka xukumadu keentay, lacag oo

dhana lama maydhee, waxa la maydhaa lacagta sharci darrada ah. Lacagtu noocay doonto ha noqotee waa in la diiwaangaliyaa.

Lifaaqa Gudiddu waxay ku soo abuurtay Gudi, gudiddaas ay abuureen ee Taliye Ciidan leh ee Taliye CID leh wax alaale wax ka khuseeya lacagaha la isu gudbinayo iyo baloodhada lala kala iibsanayo, sidaa darteed, waxaan leeyahay soo jeedinta Gudiddu maaha mid ka turjumaysa maaha Xeerka waana Xeer kale oo cusub.

Marka waxaan leeyahay Gudidda Xeerkaas ha laga saaro, Xeerkana sixitaan ha lagu sameeyo, Qodobka 23aad waxaa ku qoran la wareegida Hantida, waxa weeye qofka hantida leh intaan lacagta lala wareegin waa inuu is difaaca oo sharciga hortiisa isku difaaco, marka in lagu daro farqad kale oo ah in qofka hantida sita si sharciga waafaqsan isku difaaca oo cadeeya lacagtiisu in aanay dambi ahayn

Lacagaha la dirayo iyo ta soo galaysa waa la hubiyaa gacantana ay ku dhigaan Hay'addaha Maaliyadu.

Lacagaha waxa lagu dhisaa Hagbad ama ayuuto, waa in la hubiyaa lacagtasi in aanay meel khaldan Marin, waa in la baadhaa Meelaha lacaguhu ka gudbaan. Marka shirkad la samaynayo, meesha kuma jirto in xitaa qofka la waydiiyo meesha uu lacagta uu ka keenay.

**Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (Dable)** **(4min 40sec):-** Shir-gudoonku iyo Mudanayaashu way salaaman yihiin, horta gudoomiye Xeerarka waxaa loo sameeyaa baahida bulshada ee maaha wax la soo waarido sida bariiska iyo sonkorta sharcigu horta, Mujtamac waliba wuxuu leeyahay sifo sharcigiisa iyo isagu isu waafaqaan, 1870 markii shuuciyada la sameeyay sharcigooda markay samaynayeen Yurub bay ula tageen Ingiriiskay ka bilaabeen, waxa bilaabmay kacdoonkii warshadaha oo yurub gashay, way diideen reer yurub, ujeedadda ku jirta waxa weeye sharci marka la sameynayo wadanku waa inuu waafaqaa, diiwaangalin ma lihin oo ID card ma lihin oo kaadhkii caafimaadka ma lihin oo xogtii qoyska ma lihin, xanuunkaagii iyo waxbarashadaada meel loo raaco ma jirto, waxaynu bulsho sida masayda ah oo reer baadiye ah, ninbaa aqalkiisa lacag dhiganaya ka dibna nin booliis ah iska imanaya oo intuu u dhaco odhanaya xagaad ka keentay, marka dambena dahabka xageed ka keentay baa la odhanayaa.

Marka anigu waxaan soo jeedinayaa waa inaynu Sharcigan dib ugu noqonaa oo wixii mujtamaceena shirkadaha, bangiyada iyo qofku wuxuu gaar u leeyahay waa inaynu kala saarno, hadii kale adigoo suuqa maraya lagu qabsan oo la odhan lacagta xageed ka keentay, sharcina haduu baxo ma soo noqdo mar dambe, marka Xeerka dib ha loogu noqdo oo wixii argagixiso ah ama wax lagu boobayo ama wax lagu kharibayo aynu khad gooni ah u sameyno, laakiin mucaamaladeena jeebkeynu ku wadanaa, muwadinka wixii mucaamaladiisa daakhiliga ah wax kharibaya aynu gooni uga saarno, arrintani waxay

ku soo baxday markii Afganistan la galay oo ay ururiyeen lacagtii maraykanka lagu jabiyay.

Waxaan hadalka kaga baxaya sharciga aynu kala saarno wixii wadankeena ka jira iyo IMF-ta iyo Yurub inagu dabakhayso, hadhawto dhibaatada ka timaada muwaadinkay wax yeelaysa, taariikhduna inagay dusha inaga saaraysa, marka mucaamaladeena iyo wixii la inagu khasbayo aynu kala saarno. Waliba laba qaybood baan ka dhigaya mid mujtamaceena lagu dabiqi karo iyo mid aynu ugu talagalnay waxay IMF-tu doonayso.

**Md. Siciid Warsame Ismaaciil** **(3min 50sec):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada iyo Saxaafada Salaanta Islaamkan idinku salaamayaa Asc, marka hore waxaan rabaa ujeedooyinka guud ee Xeerka inaan ka hadlo, waxaad moodaa in Xeerka ay ka maqan yihiin meesha ujeedooyinkiisii, Magaca Xeerka ay maydhitaanka waxaan jeclaan lahaa sidii la soo jeediyay in laga dhigo maydhaanka, taas oo kaga fiican maydhista mar hadii wixii wax tuugo ah yahay.

Xeerkana xoogaa ujeedadiisii way ka maqan tahay, waxaana idiin sheegaya sidan aynu wax u wadno waxa hore ugu dhintay Xeerkii Bangiyada Ganacsiga, marka Wadanku inuu Wadan noqdo iyo inuu qol madaw oo qoloba waxay doonayso kula soo dhuumato labadaas inoo kala saara, hadaynu qol madaw inuu noqdona doonayno aynu iska dayno, hadii aynu is dawladeynayno waa loo baahan yahay Xeerkan wixii ka dhiman iyo Xeerarka kaleba in la dhamaystiro.

Qodobka eray bixinta marka la eegayo cida dambiyada gasha marka la micnaynayo waxa ku qoran sida uu dhigayo Xeerka Ciqaabta Guud, marka Xeerkaas Ciqaabta Guud maaha Xeer jira ee Xeer laga dhaxlay dawladii hore, isla markaana markasta oo aynu Xeer samayno waxbaynu kala baxnaa, marka yaan lagu qorin Xeerkaase waa in Dastuurka iyo Xeerarka kale ee Wadanka lagu qora oo halkaas lagu badalaa.

Waxaan ku soo koobaya lacagtu bixista iyo soo galista kuma aha tuugo, wadanka gudihiisa ayaa lagu samayn karaa tuugo lacagta oo sifo aan sharci ahayn, marka caqli maaha inaynu nidhaahno bixista iyo soo galistee wadanka gudihiisa wixii sifo sharci daro ah lacag kula soo baxana ha lagu daro.

**Anigu waxaan aaminsanahay** Xeerkan Wadanku wuu u baahan yahaye marka wixii laga badalayo laga badalo **Gudoomiye waxaanan soo jeedin lahaa in Xeerkan la ansixiyo.**

**Md. Cabdilaahi Xuseen Cige (Blacky)** **(1min 55sec):-** Mudane guddoomiye mudanayal xeerka I muhiim ayuu noqon karaa. Waa in xeerkani ka turjumaa arrimaheena. Xeerkani waa mid saamayn ku leh ganacsigeena, qurbo-joogteena iyo arrimaheena kale. Xeerkani ma shaqaynayo inta Baanan la helayo.

Waxaan soo jeedinayaa kuna talinayaa maadaama xeerka money loundry iyo anti terrors. Waxaa leeyahay oo aan soo jeedinayaa in xeerkan dib loo dhigo inta aynu diyaar garoobayo.

**Md. Maxamed Cisman Bulqaas** **(1min 41sec):-** Shir-gudoonka iyo Xildhibaanada Waan salaamaya ASC, runtiis shaqada koowaad e exeerku qabanayo waxa ka mid ah inay ku hogaamiyaan sida saxda ah shirkadaha iyo shakhsiyaadka ku lug leh hawlaha la xidhiidha maydhitaanka lacageed ama maalin argagixiso ah inay ka hortagaan, waana taageerayaa qodobkaas runtii, Waxa jira shakhsiyaad shaqaale dawladeed ah ama saraakiil dawladeed ah oo arrintaas maydhitaanka lacageed la xidhiidha sameeyayoo loo baahan yahay in dabagalo iyo in la ogaado halka ay lacagta ka keeneen, sidoo kale waxa jira Shirkado sameeyay maydhitaan lacagadeed oo gudaheena ah.

Marka waa waxyaabaha loo baahan yahay inuu Xeerkani dabagalo oo wax ka qabto maafiyadaas argagixisadaiyo meelaha ay ka keenaan lacagahaas, **sidaa darteed, waxaa soo jeedinayaa in la ansixiyo xeerkan maydhista lacagt.**

**Md. Axmed Maxamed Caateeye (Awoowe)** **(1min 02sec):-** Shir-gudoonka iyo Xildhibaanadu way salaaman yihiin, ugu horeyn waxaan raacsanahay magaca Xeerka ee Xildhibaanadii iga horeeyay soo jeediyeen ee Maydhaanka in laga dhigo, dalku caalamka ayuu la jaanqaadayaa waxa jira lacago badan oo aan la garanayn meesha laga keeno. Xeerkan waxaan soo jeedinayaa in la soo dhoweeyo isla markaana la ansixiyo.

**Md. Cabdiraxmaan Cismaan Caalin** **(3min 10sec):-** Xeerkan waxaa ka maqan mabaa'diidii Xeerka waxaan odhan lahaa oo aan soo jeedin lahaa inuu Xeerkani la mid yahay Xeerkii Argagixisada, mana haboona in la keeno Xeer aan bulshada ku haboonayn, 2013 kii baa Xeerka Argagixisada la inoo keenay oo xuquuqda asaasiga waxaynu ugu dhici waynay wuxuu wax u dhimayay bulshada ayuu wax yeelayay oo ku hoboonayn xuquuqdooda, Xeerkan maydhistuna waa la mid oo wuxuu markaba duraya mabaa'diida xoriyaadka lahaanshaha hantida gaar ahaaneed.

Xeerkani maanta Bulshadeena aplicable kuma ah, inagoo xal doonayna hadaynu bulshadeena mushkilad ku abuurno waa dhibaato, sidaa darteed, Xeerkaasi yaynaan ku deg-degine aynu celino.

**Md. Rashiid Maxamed Ismaaciil** **(1min 09sec):-** Xeerkani wuxuu inoo yimi 2015-kii oo la inoo keenay, waxa jira lacago la maydho oo lagu haysto guryaha hoostooda, waxaan soo jeedinayaa in xeerkan la ansixiyo si loola dagaalamo lacagaha la maydho ee dadka qaar haystaan.

**Md. Maxamed Yuusuf Axmed (Waabeeye)** **(3min 30sec):-** Magaca Xeerka sidii Xildhibaanadii horeba soo jeediyeen in la yidhaahdo Xeerka Maydhaamista halka uu ka maydhista, Gudoomiye Xeerka horaa looga dooday waxa halkan marayaa waa lifaaq ay

Gudiddu Dhaqaaluhu keentay, su'aashaydu hadaba waxay tahay Xeerkii iyo lifaaqani maxay ku kala duwan yihiin? Runtii ma jirto wax badan oo ku kala duwan yihiin, waxaana ku jira lifaaqa Qodobo muhiima oo Gudiddu hada ku soo dartay, waxaana ka mid ah Gudidda lagu assaasay Xeerkii waajibaadka iyo shaqada ay qabanayaan taas xeerka ka maqnayd iminka halkan lifaaqa lagu faafiyay, waana Gudidda La-talinta iyo ka hor-taga Maydhista lacagaha, marka Gudiddaasi shaqadii iyo waajibaadkoodii ay qabanayeen baa iminka Xeerkan lagu daray, wax kale oo ku cusubi ma jiraan.

Waxa kale oo iyana ku jirta Cutubka labaad oo lagu assaasay waaxdii dabagalka maaliyada oo ah Financial intelligence Unit, marka labadaas Gudi ayuun baa lifaaqan lagu qeexay wax kale oo cusubi kuma jiraan, waana standard sida Xildhibaankii hore soo jeediyay.

Marka anigu Waxaan soo jeedinayaa Xeerkan hay'adihii PFM-ka oo dhan baa ka wada socda wadankeenu wuxuu u baahan yahay in Hay'ada-heena maaliyadu shaqeeyaan runtii, markaasu wadanku wadan noqon karaa Bangiga dhexe awood yeelan karaa, Wasaarada Maaliyaduna urursan karta cashuuraheeda, waxaas oo dhana waxa qeexaya Xeerarkii PFM-ka oo isku xidhan iyo Xeerkan Maydhaamista oo ka dhigaya dalkeeda inaanu noqon meel lagula soo gabado wixii lala soo baxsado, **Marka waxaan soo jeedinayaa sidaas Gudiddu lifaaqa ku soo qortay in lagu Ansixiyo.**

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ______________________________ | ______________________________ |